



# ADA Australia

Your aged and disability advocates

## Adeeggaaga taageerada daryeelka waayeelka

Mid lacag la'aan ah oo wax  
kastana qarsoodi kuu yihiin,  
Dhinacaaga, hadalkaaga

(Somali/Somali)



- Ma tahay qof da' weyn oo ma u baahan tahay caawimaad lagugu siinayo guriga?
- Ma taqaanaa adeegyada daryeelka dadka da'da ah ee loo heli karo in lagu caawiyo dadka da'da ah?
- Ma u baahan tahay caawimo si aad u hesho adeegyada daryeelka waayeelka?
- Dhibaato ma kaa haysataa adeeg kasta oo daryeel dadka da'da ah oo aad hadda isticmaalayso?

Dadka da'da ah ee ku nool Australia waxay xaq u leeyihiin inay helaan adeegyada daryeelka waayeelka iyo taageerada. Waxaa jira dhowr siyaabood oo lagugu taageeri karo. Waxaa laga yaabaa inaad heli karto:

- Adeegyada daryeelka dadka da'da ah ee kugu taageeraya guriga si ay kaaga caawiyaan inaad si madaxbanaan u noolaato
- daryeel muddo-gaaban ah oo kaa caawinaya inaad cagahaaga dib ugu istaagto dhaawac ama jirro ka dib
- meel ah guryaha daryeelka waayeelka marka aadan ku noolaan karin guriga.

### Sideen ku caawin karnaa?

ADA Australia waxay bixisaa dad kuu dooda oo ku caawinaya:

- Wax ka ogow adeegyada la heli karo
- hel daryeel iyo adeegyada taageerada
- ka faa'iidayso adeegyadaada daryeelka dadka da'da ah
- faham kharashka daryeelka dadka da'da ah iyo khidmadaha/lacagaha
- xalli mashaakilaadka ama cabashooyinka ku saabsan adeegaaga daryeelka dadka da'da ah
- faham xuquuqdaada oo hubi in laguula dhaqmo si cadaalad ah oo xushmad kujirto
- Fikirkaaga ka dhiibo daryeelkaaga iyo waxyaabaha saameynta kugu leh.

### Waa maxay u doodista?

U doodista waxay ku siinaysaa taageero kaa caawineysa inaad muujiso rabitaankaaga oo aad ka hadasho xuquuqdaada iyo baahiyahaaga. U doodaha ADA Australia waa qof aan eex lahayn oo dhagaysan kara xaaladaada kaana caawin kara xalinta arimaha.

U doode (advocate) ayaa ah qof adiga dhinaaca ah waxaan hagi doona waxaad adigu rabto. Muhiimadu waxay tahay, waxay ilaalin doonaan sirtaada cidna lama hadli doonaan ilaa aad adigu rabto inay la hadlaan mooyee.

### Adeegyadayadu waa:

- Lacag la'aan, Qarsoodi, Madaxbanaan
- Adiga ayaa hagaya

Nagala soo hadal  
1800 700 600



Haddii aad u baahan tahay turjumaan  
fadlan wac 131 450

e: [info@adaaustralia.com.au](mailto:info@adaaustralia.com.au)

w: [www.adaaustralia.com.au](http://www.adaaustralia.com.au)



ADA Australia waxay aqoonsan tahay  
Mas'uuliyiinta Dhaqanka ee dhulkan waxayna siisaa ixtiraam  
Odayaashii, hore, kuwa hadda jooga iyo kuwa soo baxaya.

